## Doorka ay dhalinyarada Somaliland ka soo qaadatay Marxaladihii kala duwanaa ee Qarankani soo maray.

Waxaan jeclaystay innaan qalinka u qaato doorkii iyo kaalintii ay dhalinyarada Somaliland ka soo qaadatay, gobannimo-doonkii, halgankii dib u xorraynta iyo hadda oo aan ku jirno Qaran-dhiska Waddanka kaalinta la gudboon dhalinyaro ahaan. Sida aynu wada ogsoonahay Waddankani wuxuu soo maray duruufo kala duwan oo caqabadahooda iyo waayahooda lahaa isla markaana wakhtiyadii kala duwanaa ee duruufahaas laga dabaalanayay ay mar walba dhalinyaradu door shariif oo mudan in la xuso oo lana xasuusto ku lahayd, hadday noqoto kuwii gumaystaha Ingiriiska lagu saarayay, hadday noqoto kuwii halganka ee xorriyada iyo sharafta ummaddan lagu soo celinayay. Bal aan dib u yara milicsano doorkii ay dhalinyarada Somaliland ka soo qaateen dhaqdhaqaaqyadii gumaysi-diidka iyo xornimo-doonka ahaa ee guud ahaan Qaarada Afrika ka dhcayay sannadkii 1960-kii waaba sannadka loo bixiyay sannadkii Afrika'e. haddaynu u yara fiirsano waxa Waddanka berigaas laga aasaasay ururo dhowr ah oo ay ugu tun waynaayeen SNL,NUF iyo USP markaad u fiirsato ragga hoggaaniyay ururadaas xornimo-doonka ahaa dhammaantood waxay ahaayeen rag dhalinyaro ah. Maxamed Xaji Ibrahim Cigaal, Xaaji Ibraahim Nuur, Axmed Kayse, Maykal Mariyaano, Garaad Cali Garaad Jaamac iyo Xaaji Cumar Askar,waxay ahaayeen rag aad u da'a yar oo wakhtigaas ku jiray da'ada Soddomeeyaha, haddana hawsha ay dusha ay u riteen ee ahayd masayrka ummad dhan iyo innay dhaliyaan xornimo iyo gobannimo ayaan ahayn hawl yar balse deddal iyo juhdi badan oo ay galiyeen ayay ku rumowday.

Inta badan dadka qaar marka ay dhaliilayaan ururadii berigaas xornimada dhaliyay hoggaamiyayaashoodii iyo baarlamaankii wakhtigaas la doortay waxay yidhaahdaan dhalinyaraninada awgeed ayaa wax badani u hoos mareen oo aanay wax heshiis israac ah (act of union) ula saxeexan qoladii koonfurta balse markaad aad ugu dhug yeelato waxa kuu soo baxaysa in dhalinyaranimadu aanay ahayn qodobka kaliya ee deg degga keenay ee ay jireen qodobo kale oo dhowr ah. Inta badan Siyaasigu waxa uu ku shaqeeyaa rabitaanka iyo dareenka bulshada, wakhtigaasna waxa aad u aloosnaa dabayl ah in 5 Soomaliyeed la raadiyo, wallow ay kuba kala xooganayd 5-tii gobol ee Soomalidu deganayd gaar ahaan labadan israacay 1960-kii, tusaale ahaan Somaliland wakhtigaas dabaysha midnimo 5 Soomliyeed oo la raadiyo ayaa aad ugu waynayd waana ta keenaysa in aynu xornimadeenii tuurno halka qolada koonfurta berigaas ay aad u hoosaysay Somali jacaylka iyo Waddaniyadu ay xooganaydna ta qabiilku sababtuna waxay ahayd markii ay qaateen maamulkii daakhilga ahaa 1956-kii ayaa waxa kor u kacay dareenka qabaliga ah waxaana Siyaasadda iyo arrimaha kale ee noloshaba lagu sar-gooyay qabyaalada, iyagoo halkaas maraya ayaynu ku biirnay waa sababta xattaa Wufuudeenii halkan ka tagay iyo wixii ay wadeen ee israaca ahaaba aan halkaas waxba looga arkayn,,markii la is raacayna dawladnimadii iyo caasimadiiba ay koonfur u qaatadatay Madaxweynihii,Raysal-wasaarihii,Taliyayaashii Ciidamada sida milatariga iyo booliska iyo dhammaan Wasaaradiihii darajada A- da ahaa halka aynu qayb u helnay Guddoomiye Baarlmanaan iyo Wasaarado aan awood badan lahayn sida ta beeraha oo Axmed Kayse (AHUN) loo magacaabay, Garaad Cali ayaa isna xil aan buurnayn helay

(AHUN) halka Cigaal (AHUN) oo ahaa Raysal-wasaarihii Somaliland ee wakhtigaas laga dhigay Wasiirka gaashaandhiga.

Somaliland waligeedba waxa ay guud ahaan Somalidu hadda iyo horaba ka martidaa dhaqanka iyo suugaanta markaas markii xornimada la qaatay 1960-kii raggii calanka muuneeyay ee gabay, geeraar iyo heesba ku maamuusay rag hal-abuur ah oo dhalinyaro ahbay ahaayeen kana soo jeeda Somaliland waxaan ka xusi karnaa CabdilahI Suldaan Timacadde iyo maanasadiisa caanka ahayd ee:

Sarreeyoow ma nusqaamoow

Aan siduu yahay eegnee

Kaana siib kanna saar

NB. Timacadde waxa uu dhashay 1920-kii wakhtigaasna 40 jir buu ahaa

Waxa kale oo aan soo qaadan karnaa Abwaan Saxardiid Maxamed Cilmi( jebiye) maanasadiisii caanka ahayd ee maandeeq

Xiddigtaa muuqatee na maydhaantee

Dhaaxaan murugiyo haraad la mutaye

Maantay curatooy mataanaysee

Aan maalo hasheena maandeeq

Dhaaxaan melif iyo rasaas u mutaye

Waa maalin hor leh oon isoo marine

Magowdoo candhadii golaha marisee

Aan maalo hasheena Maandeeq

FG. Saxardiid Jebiye ( AHUN) waxa uu dhashay 1938-kii wakhtigaasna waxa uu ahaa 22 jir.

Cabdi Iidan Faarax ayaa isna ka mid ahaa raggii maalintaas 26 june 1960 xornimadaas la qaatay ka gabyay. Cabdi Iidaan ( AHUN) waxa uu dhasahy 1924-kii wakhtigaasna waxa uu ahaa 36 jir.

Waxa xusid mudan in raggan abwaanada ah ee aan sheegnay ay ahaayeen raggii ugu hor baraarugay markay arkeen in israacii labada gobol is raaceen uu leexday oo koonfur wixiiba isleekaysiisay waxaan tusaale u soo qaadan karnaa gabay uu Cabdilahi Suldaan Timacadde tiriyay 1960-kii bishii August wakhti 2 bilood waxaan dhammayn laga joogo israaca, maansadan ayuu ka hor akhriyay Raysal-wasaaarihii wakhtigaas Cabdirashiid Cali Sharmaake oo booqasho ku maryay gobollada Waddanka ayaa lagu soo dhoweeway magaalada Kalabaydh oo wakhtigaas uu joogay CabdilahI Suldaan Timacadde maanasadan waxaan ka soo qaadan karnaa baydkan uu sida tooska ugu sheegayo tabashada wakhtigaas dadka reer Somaliland ay ka qabeen sida wax loo qaybiyay.

Danteenaa laba diiday

Dabuub aanu maqlaynay

Dareen baanu ka qabnaaye

Dugsigii baarlamankiyo

Dakadii Xamar baa leh

Berbera daadku ka qaado

Dooni yaanay ku weecanoo

Duqaydii baarlamaankay

Labadaa kalaa daayoo

Yaan loo daymo la'aan

Waxaan isna soo qaadan karnaa Cabdi Idaan Faarax oo sida aan ka soo xigtay buugga uu dhowaan Boobe Yusuf Ducaale soo saaray ee (Dharaaraa ina soo maray), in Cabdi Iidan Faarax oo maalin ka qadaynaya hudheelkii Tuyuub ee magaalada Hargeysa uu arkay hashii Maandeeq oo candho wayn oo lagu hoos sawiray calankii Soomaaliyeed, markaasuu la yaabay cidda dhereg iyo dheef ka heshay markas ayuu yidhi:-

“ Cadho lageddaydaa lagu sawiray, calanka hoostiisa,

Car yaa maalay oo lisaan, caawa leeyahaye,’’

Kuwaasi hadday ahaayeen hal-abuurkii iyo abwaanadii dhalinyarada ahaa ee ree Somaliland oo durtaba sannad gudaheed tabasho ka muujinaya dawladnimadii la isku darsaday waxaan soo qaadan doonaa raggii dhalinyarada ahaa ee uu hoggaaminayay Xasan-Kayd ee reer Somaliland ee saraakiisha miletariga ahaa ee isku dayay inqilaabka 1961-kii bishii December balse nasiib-darrro uu ka fashilmay inqilaabku, doorka dhalinyarada Somaliland sidaas ayuu mar walba u muuqday.

Markii dawladdii Rayidka ahayd 1969-kii kacaanku inqilaabay ee dastuurkii Waddanka la laalay, dawladaaas milatariga ahaydna iyaduna dariiqii ay martay dawladihii ka horeeyay ee rayidka ahaa mareen ayay martay oo waliba dadka Somaliland wax uu dheerayd car juuq dheh iyo cadaadis dhinacyo badnaa oo nolosha, dhaqaalaha, siyaasadda iyo guud ahaan horumarka lagala dagaalamayay, raggii ugu horeeyay ee abwaanadda ahaa ee tooshka ku ifiyay ee si cad dawladda u dhaliilay waxay ahaayeen abwaanadii dhalinyarada ahaa ee ree Somaliland oo alifay silsilad suugaaneed la magac-baxday Siinley ragga aan ka xusi karno ee waxa ka mid ahaa:- Hadraawi, Gaarriye, Cabdiqay, Afqalooc, Siciid Saalax, Cali Saleebaan Bidde, Riiraash iyo rag badan oo aanan xusin. Waxa xusid mudan in dhalintaas abwaanada aha ay da'adoodu badi ahayd Soddomeeyo iyo wax ka hooseeya halka Gaarriye oo kale uu ahaaba 23 jir wakhtigas.

Abwaanaddu waa kuwii haddana Silsiladii Deelay ku xigsiisayay 1979-kii haddaba halganka dhalinyaro halkaas ayuu ka soo bilaabmay badina dhalinyaradani xadhig iyo ciqaab adag ayay ku muteen innay dawladnimadii leexatay ay wax ka toosiya islahaayeen.

Halganka dhalinyaradu halkaas kumuu eekaane markii la garwaaqsaday innaan hadal waxba ka tarayn rajiimka Waddanka haystay ee dirir lagala hor tago raggii kaga dhawaaqay ururkii SNM Waddanka ingiriiska 6 April 1981-kii iyo sarkiishii milatariga ahaa ee isla wakhtigaas talaabayba dhalinyaro aan soddomeeyo da'adoodu ka waynayn ayay ahaayeen. Waxa aan la hilaami Karin la hilmaami Karin dhalinyaradii UFFO ee sida mutadawacnimada ah isku xilsaaray ee adeegyada arrimaha bulshada ee caafimaadka iyo waxbarashadu ka mid ahaayeen si iskaa wax u qabso ah uga shaqaynayay in dawladdii kacaanku qoonsatay kaddibna dil iyo xabsi-daa'in markay ku xukuntay dhalinyaradu dugsiyaddu gadoodeen oo dhagaxtuurkii caanka ahaa ay sameeyeen 20 February 1982-kii waaba maalinta loo asteeyay xuska heer Qaran ee dhalinyaradda Somaliland'e. haddaba dhalinyaradu doorkaas shariifka ah ayay ku leedahay taariikhda iyo halganka Somaliland.

1988-kii markii Maxamed Siyaad Barre iyo Mengistu ay heshiiyeen ee SNM ay Khasab ku noqotay innay Waddanka gudaha u soo galaan, sarkiishii ciidanka hoggaaminaysay iyo ciidankuba badiba dhaawac iyo dhimasho noqdeen waxa qoriga qaatay oo halkoodii buuxiyay ciyaal iskuulkii iyo dhalinyaradii Somaliland si aanu halganku u wiiqmin sidaaasaana Waddanka lagu xorreeyay oo Eebbe guusha innagu siiyay, SNM-na Waddanka ugu tallinaysay 2-dii sannadood ee ugu horeeyay sidii ku qornayd dastuurka SNM, markii labbadii sannadood dhammaadeenna ay xukunkii shacabka dib ugu soo celisay.

Halkaas xikmad aad u muhiim ah oo ay SNM guud ahaan jabhadihii Qaarada Afrika ka dagaalamayay gaar ahaan kuwii Koonfurta Somaliya ee USC iyo SPM ay dheertahaybaa jira.

1. SNM markii ay Waddanka xorraysay, dadkii degi jiray Somaliland British protectorate 1960-kii iyo wixii ka horeeyayna ay Burco iskugu yimaadaan ee ay qaateen tallada in lala soo noqdo xornimadii iyo gobanimadii 1ixdankii luntay waxa ay fuliyeen heshiis SNM ee ahaa in 2 sannadood ay Waddanka doorasho gaadhsiiyaan taasna way fuliyeen waxa si gaar ah ugu amaanan Xukuumaddii wakhtigaas tallada haysay iyo Madaxweynaheedii, halka Koonfurta tii ka dhacaday aynu ognahay ee ay wax kala daaye magaalada Muqdisho maamulkeeda ay ku heshiin waayeen,
2. SNM waxa ay hirgelisay innay ku deddaasho in beelihii ree Somaliland ee aan halganka qaybta ka ahayn loo fidiyo gogol nabadeed maamulka iyo tallada Waddankana qaybtooda la siiyo, hadday noqoto xukuumada iyo baarlamaankii wakhtigaas oo ahaa Gollahii dhexe ee SNM ay beelaha kalana ku soo darsadaan xubnahooda baarlamaanka.
3. Markii SNM laga guulastayna ay xilka si nabdoon ugu wareejisay Madaxweynihii wakhtigaas guulaystay ee Cigaal.
4. SNM waxa kale oo ay 1994-kii markii hub-kadhigista la samaynayay ay waafi ah beelaha badankoodu u wareejiyeen si dawladnimadu u hanaqaado iyaga oo aan balanqaad iyo damanad kala toona aan loo samayn aan ahyn innay Ciidamada Qaranka ka mid noqdaan,

Haddaba intaasba waxa hirgeliyay ee hubkana dhigay dawladnimadana qaatay dhalinyarayaray u badnaayeen ileen iyagaa xorraynta Waddanka qayb laxaad leh ka qaataye.

Musharax Axmed ahaan waxaan haddaba go'aansaday, aniga oo gudanaya doorkayga dhalinyaranimo innaan maanta u adeegista iyo horumarinta Qarankayga aan jecelahay ee Aabbahay(AHUN) isaga oo dhalinyaro ah uu shahiiday aan kaaalinta igaga aadan horumarintiisa iyo meel-marinta himiladiisa aan ka shaqeeyo taas oo aan u arkay innaan ka mid noqdo Mushariixiinta u ordi doona jagada Gollaha Wakiilada ee Gobolka Marood-jeex. Haddii aan ku soo baxo Jagada xubin Golle Wakiileed waxaan wax ka qaban doonaa xil-wayna iska saari doonaa aniga oo gudanaya waajibaadkayga dastuuriga ah ee uu jideeyay Qodobka 53-aad ee dhigaya Waajibaadka Gollaha Wakiilada.

1. Waxaan kaalin muuqata ka qaadan doonaa Saameynta iyo wax ka beddelka Shuruucda dalka oo uu ku jiro Dastuurka JSL sida ku cad dastuutka Qaranka qoddobkiisa 53aad.

2. Waxaanan maranba hilmaami doonin matalaadda dhabta ah ee Shacabka Jamhuuriyada Somaliland iyo deegaan doorashada la iga doortay guud ahaan iyo gaar ahaan intiisa jilicsn oo aan horaba si mutadawacnimo ah ugu shaqayn jiray.

3. Waxaan ballan-qaadayaa innanan Qarankayga iyo masaryka ummadayda marnaba dhuuni dhaafsan doonin kuna eekaan doono mushaharka iyo gunnada dastuuku oggolaanshaha ii siiyay sida ku cad Qodobka 47aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

4. Maadaama Gollaha Wakiiladu uu u xilsaaranyahay ansixinta heshiisyada dawliga ah ee ay ka mid yihiin kuwa siyaasadeed, dhaqaale iyo nabadgelyo ama kuwa keenaya culays maaliyadeed oo cusub oo aan ku soo aroorin miisaaniyadda, ama keenaya soosaarid ama wax-ka beddelid qaanuun, waxaan ballan-qaadayaa innaan sida danta Qaranka iyo masayrka ummaddeenu ku jirto aan uga qayb-qaadan doono.

5. Maadaam ay waajib tahay sida ku cad dastuurka Qaranka JSL Qodobka 55aad ee Miisaaniyada u soo bandhigidda Gollaha Wakiilada xisaab-xidhka sannad maaliyadeedkii dhammaaday muddo aan ka badnayn lix bilood oo ka bilaabanta taariikhda dhammaadka sannad-maaliyadeedka, si Gollaha Wakiilladu uga doodo, go'aanna uga soo saaraan, waxaan si xilkasnimo ah u gudan doonaa waajibka iga saaraan Xildhibaan Golle wakiileed ahaaneed aniga oo mar walba danta Qaranka mudnaanta siinaya.

6. Maadaama ay ka mid tahay shaqada Gollaha Wakiilada iyo Guurtidaba haddii ay xukuumaddu soo jeediso ku-soo rogida dalka, ama qayb ka mid ah xukun deg-deg ah, innay oggolaansho waydiisatao labbada Golle waxa aan kaalin firfircoon ka qaadan doonaa innaan arrintaas ku eego indho caafmaad-qaba iyo hadba sida aan u arko in danta Qaranku ku jirto.

7. Waxaan xilka iska saari doonaa aniga oo la kaashanaya kolba guddida aan ku jiro ee Gollahayga, innaan kula xisaabtamo masuuliyiinta Xukuumadda xil-gudashadooda maadaama ay ka mid tahay shaqooyinka Gollahuhu u xil-saaranyahay.

8. Waxaan waajibkayga dastuuriga ah ka gudan doonaa ansixinta iyo oggolaansho siinta Madaxada Xukuumadda ee Madaxweynuhu soo magacaabo sida Wasiiradda,Wasiiro-ku-xigeenada iyo Madaxda kale hay'addaha dawladdaba, waxaan hubin doonaa in masuuliyiintaasi yihiin kuwii ku haboonaa shaqadaa loo igmaday.

9. Waxaan kaalin firfircoon ka qaadan doonaa ka doodidda arrimaha muhiimka ah ee maalin laha ah ee dalka ka jira, aniga oo soo xaadiri doona dhammaan kal-fadhiyada Gollaha kuwa caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahynba.

10. Sida aan ogsoonahay Miisaaaniyada Qaranka waxaa soo jeedinteeda iyo diyaarinteeda iska leh xukuumadda oo keliya balse ansixinta iyo ka doodisteedaba waxa iska leh Gollaha Wakiilada, markaas waxaan qayb-laxaad leh ka qaadan doonaa innaan waajibkayga si daacadnimo iyo hufnaani ku jirto uga gudan doodo, waxaanan hubin doonaa in Xukuumaddu u soo diyaarisay sida ay mudnaanta u kala leeyihiin baahiyaha bulshada Qaranka JSL.

11. Waxaan dedaal badan gali doonaa innaan aniga oo la shaqaynaya guddi-hoosadka Gollaha ee aan ka mid noqon doono, innaan xaqiijino kormeerka, kor-joogtaynta iyo toosinta shaqada Xukuumadda.

12. Waxaan aan xilwayn iska saari doonaa, deddaal wayna aan ku bixin doonaa arrimaha haweenka iyo beelaha gobta ah ee dadkeennu hayb-soocaan innaan wixii in aan mar walba qadiyadooda difaaci doono una dhego-nuglaan doono wixii tabashooyin ah ee ay Gollaha keenaan.

Marka laga yimaado 12-kaas qodob ee aan sarre ku xusay oo ah shaqada sida toos ah iigu taala haddii aan ku soo baxo Gollaha Wakiilada Jamhuuriyadda Somaliland, waxa kale oo jira shaqooyin kale oo badan oo ka dhalanaya masuuliyadayda Xildhibaanimo iyo xidhiidhka ka dhexeeya saddexda dhadhaar ee dawladnimada, fulinta, sharci-dejinta iyo garsoorka oo haddii ay si wacan u wada shaqeeyaan iyaga oo kala madax banaan guulo badan Qaranku gaadhi karo sida:-

1. In dhaqaalaha Waddanka iyo Kobociisa laga shaqeeyo (Promoting and Ensuring Sustainable Economic Growth).
2. In la xaqiiyo dawlad-wanaag tii oo lala dagaalamayo musuqmaasuqa iyo waxyaabha kale ee dawladnimada ragaadiya
3. In la Qaranka loo raadiyo maal-gashiyo dibaddeed (Foreign Direct Investment).
4. Samaynta Xeerka Ikaashiga Dawladda iyo Ganaciga gaar ah (Public-private partnership).

**Xeerka Iskaashiga Dawaladda iyo Ganacsiga Gaarka ah (Public-private partnership)**

Inta aan ogahay sidoo kalena Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland mudane Muuse Biixi Cabdi-na mar uu wareegto Madaxweyne kula wareegayay buugga dhaq-dhaqaaqa gaadiidka (Circulation Book) iyo summadda Tirsiga Gaadiidka ( Plate number) 18 December 2019-kii ayaa waxa uu ku xusay isla wareegtadaas, innaanu jirin Xeerka Iskaashiga Dawladda iyo Gancasiga gaar ah (PPP act) haddana waxaynu aragnaa iyadoo xukuumadduhu mararka qaar hantida dawladda qaar ka mid ku wareejinaya ganacsiga gaarka ah iyagoo aanu jirin wax xeer ah oo loo raacay.

Sida aynu wada ogsoonahay Waddamada adduunka intooda badan way leeyihiin waxan loo yaqaan Ppublic-private partnership) oo ah nidaam ay Dawladda iyo shirkadaha madaxa banaani iskaga kaashaadaan maal-gelinta mashaariicda qaar waliba inta badan haddaad wax yara baadhbaadho waxaad arkaysaa mashaariicdaasi waxay u badan yihiin kuwa lagu horumarinayo kaabayaasha dhaqaalaha(Economic Infrastructures) sida Waddooyinka, madaarada, dekedaha, korontada( Power supply), biriijyada IWM. Inta badana ujeedada ay dawladduhu ka leeyihiin waxa lagu soo koobaa laba qodob:

**1.** In marka ay Dawladdu ay waydo maaliyad ku filan oo ay mashaariicdeeda ku maal-geliso in ay Private Sector-ka awoodeeda qayb ka mid ah u daadajiso si loo ga taageero xagga maaliyadda.

**2.** In wakhtiga mashruucaasi soconayo la soo koobo si dhakhso looga jawaabo baahiyaha bulshhda tii oo aan laga tanaasulayn tayada adeega markaas la wado, balse maadaama ay mashruuca (Two Entities) iska kaashanayaan uu wakhtigu soo koobmo.

Waxa qorshaha iigu jirta Axmed ahaan in haddii aan ku soo baxo Gollaha Wakiilada Jamhuuriyadda Somaliland innaan ka shaqayn doono sidii loo samayn lahaa xeerkaas iskaashiga dawaladda iyo ganacsiga gaarka ah, si haddiiba looga maarmi waayo in hantida Qaranka cid gaar ah lagu wareejiyo loo maro dariiqaas sharciga ah.

**Muxuu yahay Koboc dhaqaale Sidee baana loo kordhiyayaa dhaqaalaha Waddanka?**

Muxuu yahay koboc dhaqaale (Economic growth)? Koboc dhaqaale waa kordhinta wax-soosaarka alaabada iyo adeegga (goods and services) Waddan leeyahay wakhti cayiman. Markaynu alaab leenahay waa dhammaan wixii badeecad ah ee la taaban karo, markaynu adeeg leenahayna waa dhammaan adeegyada ay caafimaadka, waxbarashada, dalxiiska iyo wixii la hal-maalaa ka mid yihiin. Koboca ku yimaada dhqaaluhu waxa uu wax wayn ka beddelaa nolosha dadka Waddankaas

ku nool (Standard of living), haddii dhaqaaluhu koboc sameeyo waxa samaysma shaqo abuur, dakhliga dawladda oo kordha, waxa hoos u dhaca heerka fakhriga ee Waddankas, sidoo kale waxa yaraada danbiyada ay xatooyadu ka mid tahay.

Haddii uu dhaqaalaha koboc ku yimaaddo ganacsiyadu waxa ay helaan faa'iido, tanina waxa ay keentaa inay shaqaale badan qaataan, shaqooyin badan ayaana abuurma, dakhliga shaqaalaha ayaana kordha, taasina waxa ay kordhisaa dalabka alaabada iyo adeegga (Demand for goods and services), sidaas ayuuna dhaqaaluhu hore ugu maraa. Waxa ugu wayn ee lagu cabiro koboca dhaqaaluhu waa GDP-ga Waddanka, kaas oo la isku daro afartiisa waaxood ama qaybood ( Components of GDP) ee kala ah:-

**1**.Kharashaadka guud ee shacabka (Consumers spending).

**2**. Maal-galinta ganacsi (Investment).

**3.** Kharashaadka dawladda (Government spending)

**4.** Faraqa dhoofka iyo soo dhoofsashada oo la kala jaro (Export-import).

**Siyaasadaha lagu kobciyo dhaqaalaha Waddan leeyahay waxa kamid ah: -**

- In cashuuraha laga dhimo alaabaha aasaasiga ah amaba in guud ahaan cashuuraha waddanka hoos loo dhigo
- In ay dawladdu kordhiso maalgalinta amaba kharashaadkeeda
- In ganacsiyo badan oo dawladdu ay iska leedahay qaybo kamid ah saami laga siiyo dadka shacabka ah
- In kor loo qaado aqoonta dadka, xirfadooda iyo caafimaadkoodaba si ay ugu soo dhiiradaan ganacsato fara badan
- Kor u qaadidda kaabayaasha dhaqaalaha sida Wadooyinka, dakadaha, garoomada diyaaradaha IWM.

**Doorka aan ka qaadan doono helitaanka Maal-gashi dibeddeed oo Qaranku helo (Foreign Direct Investment).**

Haddaan si guud uga hadalno guud ahaan Waddamada adduunka marka ay shirkdaha waawayn maalgashi dibeddeed ka samaynayaan waxyaaba ay xisaabta ku dirsadaan kuna go'aan qaataan waxa ugu mudan qodobadan soo socda:

**1.** In Waddanka ay maalgashanayaan shuruuc adag oo maalgashi leeyahay oo haddii berri ka maalin ay is qabtaan ay si sharci ah ugu kala bixi karaan xoolahoodana damaamanad ugu heli karaan. (effective and functioning foreign direct investment laws).

**2.(**Stability of Prices/Low of Inflation) Maadaama inta badan shirkadaha Waddanka maalgashiga ka samaynayaa ay iyaguna faa'iido doon yihiin waa in Waddanka la maal-gashanayaa dadkiisu yihiin qaar wax lagafaa'iidi karo oo awoodooda wax iibsugu (purchasing power) wacantahay, sidoo kale ascaartu yihiin qaar la isku halayn karo oo aan Waddanka sicirbarar laaxad leh ka jirin.

**3**.Xasilooni siyaasadeed (political stability) in Waddanku leeyahay oo aan dawladdnimada iyo nidaamka Waddanku si fudud u burbri karin ama u dhaawacmi karin, gaar ahaan wakhtiyada doorashada in kursiga si nabdoon la iskugu wareejiyo.

**4.**Waxa isna wax kale oo la yidhaa furfurnaanta Ganacsiga (Trade openness) macno ahaan Furfurnaanta ganacsigu waa halbeeg lagu cabiro ilaa heerka Waddan uu ku howlan yahay nidaamka ganacsiga aduunka iyo maal-gashiga. Furfurnaanta ganacsiga waxaa badanaa lagu cabiraa saamiga u dhexeeya wadarta dhoofinta iyo soo dejinta iyo wax soo saarka guud ee gudaha (GDP), markaas Somaliland waxa la gudboon innay Waxsoosaarkeeda gudaha kordhiso sidoo kalena ay ku deddaasho waxyaabaha uu Waddanka dibedda u dhoofin karo sida Xoolaha, khayraadka baddaha, Xabkaha iyo beeyada IWM, si aynu u soo jiidano indhaha maalgashadaayasha caalamka.

**5.**Sicirka sarrifka go'an (Fixed Foreign Exchange) waa mid ka mid ah waxyaabha Maalgashadayaasha soo jiita, maadaama mar walba ama inta badan lacagta wax lagu kala beddelanayaa ama iibsanayaa ay tahay lacagta Waddanka (local Currency), waa in sicirka isku-beddelka lacagtu uu fadhiyaa ama aanu aad isku beddelayn si shirkadaha faa'iido doonka ah ee Waddanka maalgashanayaa ay ugu xisaabtami karto oo aanay ugu khasaarin inta u dhaxaysa isku-beddelka labbada lacagood.

Marka aynu rabno in aynu maal-gashadayaal caalamiya aynu helno waxa muhiim inoo ah inaynu ku xisaabtanno khayraadka kala duwan ee yaalla Goboladeena;

Tusaale ahaan gobolka Saaxil waxa laga maalgalin karaa ganacsiyo la xidhiidha kalluumaysiga, goboladda Togdheer iyo Soolna waxa laga maalgashan karaa ganacsiyada la xidhiidha ;Biyaha, xoolaha nool, gobolka Sanaag oo kale ganacsiyada laga maalgalin karaa waa kuwa la xidhiidha Xabagta, Beenyada, xoolaha nool, dalxiiska, macdanaha iyo kalluumaysiga, sida oo kale gobolka Awdal waxa laga maalgalin karaa ganacsiyada la xidhiidha khayraadka dabiiciga ah, beeraha, xoolaha, macdanaha iyo kalluumaysiga. Ugu danbayn gobolka ay caasimaddu ku taalo ee Maroodi-jeex waa gobolka ugu dadka badan leh gobolada Somaliland, maalgalin kastana wuxuu unoqon karaa ama sal amma gundhig.

Haddaba dhammaan qoddobada aan kor ku xusay badankoodu waxa waajibkooda iyo fulintoodaba iska leh Gollaha Xukuumadda marka laga yimaado qodobka koowaad oo ah samaynta shuruuc maal-gashi oo adag oo ah waajibaadka Gollaha Wakiilada, haddaba anigu Axmed ahaan waxaan xil iska saari doonaa qaybtaydana qaadan doonaa in wixii shuruuc ah ee Gollaha ku dhiman la dhammaystiro wixii shaqada Xukuumaddaha ahna in aan kula xisaaabtami doono xaqiijinteeda si loo abuuro jawi maal-gashi oo dalka ka hirgalala, si kor loogu qaado dhaqaaalaha Waddanka, loona helo shaqo abuur iyo guud ahaan mustawaha nolosha dadka ( standard of living) oo wanaagsanaata.

**Muhiimada iyo Mudnaanta Kaabayaasha dhaqaalaha iyo Waxa iiga Qorshaysan**

Qaran kastaba waxa horumarkiisa dhaqaale door wayn ka ciyaara kaabayaal dhaqaale oo horumarsan oo laga hirgaliyo. Run ahaantii kaabayaasha dhaqaalaha Somaliland waxaa burbur wayn uu ka soo gaadhay dagaaladii lala galay kacaankii Siyaad Barre, laakiin intii ay xornimada dib ula soo noqotay jamhuuriyadda Somaliland waxay horumar la taaban karo ka samaysay dib u dhiska kaabayaasha dhaqaalaha hadday tahay waddooyin, garoomo diyaaradeed iyo dakaddaha ha ugu miisaan waynaato dakadda Berbera’e. Jamhuuriyadda Somaliland si ay u hesho maal-gashi dibaddeed horumarinta iyo dhismaha kaabayaasha dhaqaaluha waa inay ka dhigataa kan ugu horeeya ahdaafteeda horumarka Waddanka. Haddii aynu eegno balaadhinta dakadda Berbera iyo dhismaha wadada Berbera ilaa Wajaale waxay door wayn ka ciyaari doonaan helidda maalgashi dibadeed oo uu soo jiito Qaranku. Koboca aad ka u sareeya ee ku yimid magaaloyinka oo ay sababeen dadkii reer guuraaga ahaa oo duruufooyin kala duwan ka soo kaxeeyeen miyiga waxa uu inagu khasbayaa inaynu dardar galino dhismayaasha wadooyinka iyo adeegya bulshadda ee magaalooyinka.

Sida ku xusan buugga qorshaha horumarinta Qaranka ee 2017 ilaa 2021 ee bogga 98, In ka badan boqoolkiiba 99 isku socodka dadka iyo dhaqaalaha jamhuuriyadda Somaliland waxa uu maraa waddooyinka taas oo ka dhigaysa tiirka ugu muhiimsan ee kaabayaasha dhaqaalaha jamhuuriyadda Somaliland ayna tahay in mudnaanta kowaad la siiyo dhismihiisa, dayactirkiisa iyo balaadhintiisaba. Run ahaantii waxaynu u baahanahay in bulshadda, ganacsatadda iyo dawladduba iska kaashadaan dhismaha waddooyinka jamhuuriyadda Somaliland. Waxaan doonayaa inaan door wayn ka ciyaaro dhaqaajinta iyo raadinta kharashka ku baxaya wadada isku xidha caasimadda Hargeysa iyo degmada Xarshin ee dawlad deegaanka Soomalida Itoobiya. Dhismaha wadadaasi wuxuu aad u fududayn doonaa isku socodka dadka iyo dhaqaalaha ee bulsho-waynta degta degmada Xarshin, deegaanadda ku teedsan xadka iyo Caasimadda Hargeysa. Waxaan deddaal

badan galin doona dardar-galinta shaqooyinka guddi hoosaadka qaabilsan kaabayaasha dhaqaala ee baarlamaanka, si Qaranku u gaadho isku filnaansho dhanka kaabayaasha dhaqaalaha ah.

**Muhiimadda Dawlad-wanaagga iyo doorka aan ka qaadan doono Xaqiijintiisa**

Dawlad wanaaggu waa xuquuqda aasaasiga ah ee muwaadinka ku dhex nool bulsho oo heerka ugu sareysa loo xafido iyadoo saldhig looga dhigayo dimuquraadiyad, daahfurnaan, isla xisaabtan iyo hay'ado dawladeed oo si hufnaani ku dheehantay u shaqeeya. Jamhuuriyadda Somaliland waxay xornimadeeda dib ula soo noqotay 1991 kadib halgan 10 sannadood ah oo ay hormuud u ahayd jabhaddii SNM. Dawladnimadda Somaliland waxay ka koobantay saddex dhardhaar oo is dhamaystiraya kuwaas oo kala ah hay'adda fulinta, hay'adda sharci dajinta iyo hayadda cadaaladda. Bulshawaynta jamhuuriyadda Somaliland waxaa u himilo ah dal nabdoon oo dimuquraaddi ah samaynaya koboc dhaqaale iyo mid aqoon bulsheed. Si ay taasi inoogu suuro gasho waxaynu u baahanay sii xoojinta hayaddaha nabadgalyada, dimuquraadiyadda iyo maamul daadajinta iyo sii xoojinta xidhiidhada dibadeed ee qaranku leeyahay.

Anigoo doorka sharci dajinta ee Gollaha Wakiilada Qaranka Jahmhuuriyadda Somaliland meelmarinaya, waxaan Xildhibaan Golle baarlamaan ahaan xil wayn iska saari doonaa in hay'adda fulinta lagu dabagalo hirgalinta nidaam maamul-wanaag tii oo lugula xisaabtamayo qaybaheeda kala duwan innay xaqiijiyaan nidaamka daahfurnaanta islaxisaabtanka lana xoojiyo shaqooyinka hay'adda Maamul-wanaaga iyo ladagaalanka musuqmaasuqa.